


Adeegyada xadaaradda  
Waxbarashada dugsiga hoose-dhexe

somali

Warbixin loogu talagalay waalidiinta iyo mas'uuliyiinta qoysaska ah ee luqadaha badan ku hadla

## BARISTA AFKA HOOYO EE ILMAHA EE WAXBARASHO HORAADKA IYO DUGSIGA HOOSE DHEXE

- Dugsiga hoose-dhexe ee magaalada Tampere wuxuu u diyaarinayaa ardayda afafka badan ku hadla in da'da dugsiga dhexe-hoose iyo waxbarasho horaadka loogu dhigo afkooda hooyo. Waxbaristu waxaay ku baxaysaa wakhti xaadirkan 30 af in ka badan. Kooxo cusub ayaa la aasaasi karaa marka la isa soo diwaangaliyo ee fursad loo helo.
- Barashada afka hooyo waxaa loogu talagalay gaar ahaan ardayda reer Tampere ah ee afkooda hooyo uunan ahayn finnishka ma iswidhish. Ardeyda degmooyinka kale ka yimaadda waxaay ka soo qaybqaadan karaan kooxaha degmada Tampere haddii diyaariyaha waxbarashada heshiis gaar ah lagula galo. Waxbarista waxa kaloo ka qaybqaadan kara ardeyda finnishka ah ee waddan dibad ah dib ugaga soo guuray rabana afkii ay dibadda ku barten inay ilaashadaan aqoontiisa.
- Barashada afka hooyo looguma talo galin dadka barbaradka ah. Macallinka ayaa qiimeyna aqoonta afka hooto ee ardayga haddii loo baahdo intaanu bilaabin barista. Ardaygu kuma heli karo maadadan waxbarashadeeda luqadda uu iskuulka kaga barto maaddooyinka kale. Ardeygu wuxuu ka qayb qaadan karaa barashada hal af oo hooyo oo kaliya.
- Kooxda waxbarashada waa in ay ka koobnaadaan ugu yaraan lix arday oo iskuulka hoose-dhexe ah. Kooxaha badankooda waxaa dhigaya macallimiin afafkaas u dhashay. Doorashada waxbarashado waa mid ikhtiyaar ku salleysan laakiin hadii la bilaabayba barashada afka hooyo waa khasab in uu ka qaybqaato ardaygu. Ardeygu wuxuu ka helayaa waxbarashadiisa shahaado gaar ah marka uu si joogto ah uga qaybqaato.
- In waxbarashada laga qaybqaato waxaa mar walba ku xidhan in si elektroonig ah la isku diwaangaliyo. Wakhtiyada isdiwaangalinta iyo hagitaanka waaad ka heli kartaa bogga waxbarashada dugsiga hoose-dhexe ee bogga internetka ee magaalada Tampere ku jira.  
([www.tampere.fi](http://www.tampere.fi) erayada oo ah *Tampere oma äidinkieli* ama *Tampere Native language*)
- Waxbarashadu waxaay bilaabmaysaa bisha oogost bartamaha. Macallinka afka hooyo ayaa soo sheegaya inta aanay waxbarashadu bilaabanin goorta iyo goobta waxbarashada. Goobta waxbarashadu waxaay noqon kartaa meel aan ahayn ardayga dugsigiisa. Waalidka ayaa ka warhaynaya in ilmahooda ay keenaan xiisadda oo ay geeyaan guriga. Xiisaduhu waxay inta badan yihiin galabtii maalinta iskuulka ka dib.
- Waxbarashadu waa lacag la'aan waxaana la siiyaa ardeyda iskuulka hoose/dhexe 2 cashar todobaadkii iyo 1 cashar todobaadkiiba ardayda dhigata iskuullada barbaarinta hore.
- Waxbarashadu waxay ku salleysantahay qorshaha waxbarista oo hiigsigiisu yahay in ilmuhu uu helo aqoon af ah oo qani ah iyo in lagu taagero ilaalinta afkiisa iyo dhaqankiisa. In ilmuhu uu afkiisa si qani ah u yaqaano waxay taageeraysaa in uu afafka kalena barto.



Adeegyada xadaaradda  
Waxbarashada dugsiiga hoose-dhexe

somali

## KU SOO DHAWOOW BARASHADA AFKAAGA HOOYO!

Magaalada Tampere, adeegyada xadaaradda, waxbarashada aasaasiga

